

## U dabaaldagista dhaqanka Alberta

Sebtambar 01, 2023 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Sebtambar 1 waxaa bilaabanaya Maalmaha Dhaqanka ee Alberta, ee loogu dabaaldagayo farshaxanka, muusika, cuntada, jaaska iyo kuwo kale oo badan muddo bil ah.

2023 waxay ku beegan tahay sannad guuradii 15-aad ee Maalmaha Dhaqanka Alberta. Sebtambar oo dhan, dadka reer Alberta waxay bookhan karaan goobo fara badan oo gobolka oo dhan ah si loogu dabaaldago dhaqanka qaniga ah ee wanaagsan ee gobolka. Farshaxamaysteyaasha, kooxaha dhaqanka, dadka jaasa, filin sameeyeyaasha iyo fanaaniintu waxay soo bandhigi doonaan shaqadooda taasoo kaalin muhiim ah ka cayaaraysa isku haynta dhaqanka qaniga ah ee Alberta.

“Maalmaha Dhaqanka ee Alberta ee sannadkan waxaa loogu dabaldagayaa 15 sanno oo laysugu keenay calaamado qurux badan oo ah farshaxanka iyo dhaqanka Alberta. Waaan dadka reer Alberta ku dhiirigalinayaa inay wakhti ugu tala galaan u dabaaldagista waxyabaha isugu jira dhaqanka iyo bulshada ee kala duwan, qaniga ah, bishan Sibtambar.”

*Tanya Fir, Wasiirka Farshaxanka, Dhaqanka iyo Haweenka*

Alberta waxay bilowday in ay bil dhan ugu tala gasho dabaaldagga farshaxanka sannadkii 2019 waana gobolka kaliya ee sidaas wali samaynaya.

“Deeqaha Maalmaha Dhaqanka Alberta waxay fursad noo siiyeen in aan dadka reer Alberta si bilaash ah ula wadaagno farshaxan cajiib ah. Kooxaha muusikada garaaca ee sannadkaan imaanaya Maydaanka, dadka reer Alberta waxay kusoo celin doonaan xasuusta muusikadii ay kusoo koreen, waxaana farxad noo ah in dhacdadaanu bilow u noqonayso udabaaldaga farshaxanka iyo dhaqanka oo bil soconaya.”

*Annemarie Leenhouts-Petrov, madaxweynaha iyo guddoomiyaha, Francis Winspear Centre for Music/ Edmonton Symphony Orchestra*

Wasaaradda Farshaxanka, Dhaqanka iyo Haweenku waxay 115 deeqood ku abaalmarisay ururo gobolka oo dhan ah si ay u martigaliyaan dhacdooyinka Maalmaha Dhaqanka Alberta. Goobaha dabaaladagga ee shanta ah waxay heleen maalgalin si ay u martigaliyaan dhacdooyin bilaash ah, qoyska ku habboon oo soconaya muddo saddex maalmood ah.

Goobaha dabaaladaggu sannadkaan ka dhacayo waa:

- Arts Council Wood Buffalo
- Edmonton Movie Club
- Hispanic Arts Society
- The Bailey Theatre Society
- The Canadian Mountain Arts Foundation (waxay u shaqaynaysaa sidii goob farshaxan)

## Xaqiiqooyin kooban

- Sannadkan, dowladda Alberta waxay bixisay \$374,000 si ay ugu caawiso qorshaynta iyo iskudubaridka goobaha dabaaldagga oo gaaraya 115 goobood oo gobolka oo dhan ku yaala.
- Dhammaanba dhacdooyinka Maalmaha Dhaqanku waa bilaash waana kuwo u furan dadweynaha.
- Dowladda Alberta waxay sidoo kale maalgalisay wadar ahaan 74 martigaliye oo ah goobaha dabaaldagga (dhacdooyin laba maalmood soconaya) iyo kuwo 36 ah oo fudud (dhacdo hal maalin ah) si ay u martigaliyaan howlaha iyo dhacdooyinka.

## Macluumaad la xiriira

- [Maalmaha dhaqanka ee Alberta](#)
- [Taariikhaha Maalmaha Dhaqanka](#)
- [Bisha Farshaxanka](#)